

LANCASTER WEST

MACLUUMAADKA UGU DANBEEYAY

LANCASTER WEST
KOOXDA XAAFADA

WT11

DAYTRA/JILAALKA 2019

Qofkii ugu horeeyay ee deganaa LancWest waxa uu usoo guuray guryaha dayactirka lagu sameeya

WAXAAD AKHRIDAA SHEEKADA DHAN EE KU TAAL BOGA 2



Goyska Cabelto ayaa haa cida kowaad ee deganayd kuwaas oo usoo guuray guriga la hagaajiyay, oo ay soo dhaweeyeen LWNT's James Caspell

Deganaa Vladimir Volkov oo diyaarsaday gurigiisa cusbaa ee LWNT's Desmond Zephyr



THE ROYAL BOROUGH OF
KENSINGTON
AND CHELSEA



Qaababka nooloolasoo xidhiidhi karo anaka, u wareeg boga danba



Cidii ugu horeysay LancWest ee degen ee la habeeyay ayaa usoo guuray

Dadka degan Lancaster West waxay sheegeen inay u guurayaan guriga la hagaajiyay ee Qorshaynta Kirada Deegaanka. Dhamaan sagaalka qoys waxay u guureen ilaa iminka oo waxay ka faa'idayaan kiro weligood ah.

Qoyska Cabelto (sawirka dusha) waxay u guureen dabaqa labada qol ah Agoosto: "Waxaa weeye qoyska kowaad ee la siiyo kiro qarniga 21aad dabaqan ah taas oo maamuus ahayn. Wax kasta oo kamid ah waanu jecel nahay." Vladimir Volkov, oo kamid ah dadka kale ee degab (sawirka dusha ku yaal), ayaa sheegey inuu ku faraxsan yahay gurigiisa cusub ee halka qol ah: "Wax wayn ayay iiga dhigan tahay. Waxaan ku jiray guri kumeel gaadh ah markii hore taas oo ahayn mid aad u warwar badan maadaama oo aad garanayso inaad wakhti kasta ka guuri karto. Kani iminka waa guri rasmi ah, markaa waxaad ka dhigan karaa hoy."

Marcia Moses, oo dhawaan usoo guurtay gurigeeda csuub iyada iyo sadexdeeda caruur ah ayaa si gaar ah ugu faraxsaday inta uu le'eg yahay gurigeedu: "Waxaan ugu danbayntii usoo

guuray qol kaligay ah oo waxaa jira meel wiilasha u banaan. Waxaan deganaa hantiday 20 sano waana noo muhiim in aanu halkan deganaano. Guriga cusub waa cajiib. Waan la mastacajabay. Maan filanaynin inay inuu sidan u qurux bato, oo waxaan u guuri karaa iminkaba maadaaam oo dhamaan shaqadii laga qabtay."

Gurigu waxa ay hoos yimaadaa Qorshaha Kiraynta Deegaanka taas oo dhashay Juulay. Qorshuhu waxa nidaam ku salaysan dhibco oo ay wada qorsheeyeen dadka deegaanka. Waxaa lagu xaqiijinayaa in dadka ku nool hantidu wakhtiga masiibada ay helaan ikhtiyaarka kowaad ee hagaajinta hantida oo ay helaan kiro noloshooda oo dhan ah.

Hanti badan oo banaan oo hal qol ilaa guri sadex qol ah ayaa la heli doonaa dhawrka bilood ee soo socda. Hadii aad doonayso inaad dalbato, fadlan la xidhiidh **020 7361 3008** or **housingopportunities@rbkc.gov.uk** Waxaanu sidoo kale qaban doonaa munaabsado dheeraad ah oo loogu talo geley dadka deegaanka si loo arko inay naftooda u diyaarshaan guryaha.

Waxaa socota Qorshaha Kiraynta Deegaanka oo tiro ah

9 QORSASKA LANCWEST EE ILAA IMINKA SOO GUURAY 

25 GURYAHA BANAAN EE WAKHTI XAADIRKAN LA HAGAAJIYAY 

35 HANTIDA MUSTAQBALKA IN LA HAGAAJIYO LOO DIYAARIYAY 

£57.9 milyan oo lacag dheeraad ah ayaa la heley si dayactir loogu sameeyo guryaha

Kadib markii in badal lagala shaqeyay Ururka Dadka Deegaanka Lancaster West, iyo sidoo kale dad deegaan iyo shaqaalaha degan oo ka shaqeyaa hantida, waxaanu ku guulaysanay in aanu helno lacagta Kooxda Hogaanka Dawlada Hoose Juulay. Heerkan kordhay ee deeqda ah ayaa ah inta u dhaxeesa £30m ilaa £57.9m.

Tani waxay ku filan tahay in la bixiyo dayactir aad u wanaagsan oo ay kamid yihiin:

- ▶ In la badalo kulayliyaha iyo nidaamyada biyaha kulul guryaha wakhti xaadirkan ku tiirsan laba nidaam ee degmada ee jira.
- ▶ Nidaam fiidyaw oo cusub oo albaabka laga soo galayo oo guri kasta oo ku yaal hantida ah.
- ▶ Albaab laba lakab oo muraayad ahdhamaan dhismayaasha ee aan lahayn.
- ▶ Madbakhyo iyo suuliyayaal cusub oo casri ah oo badanaa kiraystayaasha doonaya ama u baahan ah.

Barnaamijka ugu danbeeya iyo tanaxaha shaqooyinka waxay horseedi doontaa oo la wada qorshayn doonaa dadka deegaanka. Waxaa sidoo

kale loogu sheegi doonaa taxane xog uruurin ah kaas oo loogu talo galay in lagu dhamaystiro guri kasta. Waxaanu ku wadnaa in aanu dhamaystirno dhamaadka dayrta 2020.

Maamulaha Xaafada, James Caspell waxa uu yidhi: "Tan waa war wanaagsan oo dadka deegaan ah iyo hantida ah, oo waxay muujinaysaa dadaalka heer kasta oo dawlada ah lagu xaqiijinayo in lagu balan qaado inay noqdaan tusaale qarniga 21aad guryo ah oo laga dhabeeyo. Waxa aanu iminka bilaabaynaa dib u habayn aad u wayn taas oo qof kasta oo deegaanka ahi uu ka faa'idi doono, markaa iyada oo lasiiwadayo in la baadho khayraad dheeraad ah oo deeqda ah oo la heli karo oo ay ka faa'idayaan dadka deegaanku mustaqbalka".

Wixii macluumaad dheeraad ah ee barnaamijka dayactirka, fadlan iimeel u dir lanwestrefurb@rbkc.gov.uk



Sidee ayuu korodhka yahay marka la barbar dhigo deeqihii lacageed ee hore

WAXA AY AHAYD £30m

IMINKANA WAA £57.9m

Su'aalaha badanaa la iska waydiiyo dib u habaynta

Goorma ayay bilaabmaysaa dib u habayntu?

Dib u habayntu way bilaabantayba. Dhamaadka 2019, ilaa boqolkiiba 10 dhamaan guryuhu waxaa loo samayn doonaa madbakh iyo/ama suuliyado cusub.

Marka laga hadlo barnamijka balaadhan ee dib u habaynta ee inta hadhsan ee guryaha, badanaa shaqada badankeedu waxay bilaabmi doontaa horaanta 2021.

Iminka maxaa socdaa?

Iminka deeqda lacageed ee £57.9 milyan waa la heley, oo waxaanu u wareegaynaa wajigii soo iibinta - waxaanan u shaqaalaysiinaynaa dadka iyo hay'adaha inay keenaan nashqada iyo barnaamijyada dib u habaynta.

Marka la eego qiimaha shaqada, nidaamka waxaa lagu maamulaa

sharciga iyo shuruudaha si ay wakhtigeeda ugu bilaabanto.

Waxaanu rajaynaynaa in aanu bilawno wajiga nashqada horaanta 2020.

Sida ay dadka deegaanku ugu lug yeelanayaan?

Waxaa naga go'an in dadka deegaanku ay ilaa inta macquulka ah ay ka qayb galaan.

Waxaanu wadnaa awoon iswaydaarsi wada nashqadayn ah oo dhisme kasta aanu u qabano si aanu u dhagaysano mudnaanaha dadka deegaanka oo miisaaniyada ku jira.

Waxaanu sidoo kale qabanaynaa munaasabo Guriga Furan ah, taas oo aanu ku siinayno dadka deegaanka fursad ay ku arkayaan sida dib u habayntu u eekaanayso. Dhamaan fikiradani waxa ay naga caawinaysaa in aanu ogaano nashqada.

Sidee ayaan macluumaadka barnaamijka dib u habaynta ula soconayaa?

Waxaad kala socon kartaa Instagram [lancasterwestneighbourhoodteam](https://www.instagram.com/lancasterwestneighbourhoodteam) ama iimeelka lanwestrefurb@rbkc.gov.uk

Waxaad sidoo kale la hadli kartaa **0800 389 2005** ama waxaad booqan kartaa kooxda la shaqaynaysa dadka deegaanka Baseline Studios Unit 22 Salaasa kasta 2 duhurnimo.



Qiimo dhimista shaqooyinka cida haysta heshiiska kirada


Bixintii hore ee qiimo dhimista ee kirada dadka deegaanka waxaa ay noqon doontaa xadiga dhan ee £57.9m.

Dadka deegaanka ee heshiiska kirada ah haysta - oo ay ku jiraan mulkiyada la wadaago - kaalmada Dawlada Hoose waxaa la yarayn doonaa boqolkiiba 20 taas oo dabaqi doono marka shaqada dib u qaadida la samaynayo. Kaalmada dawlada dhexe (£24.9m) dib loogama qaadayo dadka deegaanka ee kirada haysta Tani waxay u dhigantaa boqolkiiba 54.4 qiimo dhimis dadka deegaanka ee heshiiska kirada ah haysta kuwaas

oo deganaa wakhtiga masiibada, iyo sidoo kale wakhtiga la iska doonayo in la bixiyo kharashka. Sidoo kale, kharashka mustaqbalka ee ugu badan ee dadka kirada haystaa waxa uu noqonayaa £15,000 mudo shan sano ah halka deeqda dawlada laga faa'idayn doono, oo heer badan oo dib u gudid qaabab ah ayaa la hirgelin doonaa si loo xaqiijiyo in adduunku la isgaadhsiyo dayactirka darteed.

Kadib dalabka LWRA, kaas oo ilaa markii lagu heshiiyay Hogaanka Dawlada Hoose, kiraystayaasha aan deegaanka ahayn (sida, Notting Hill Genesis iyo mulkiyaaasha u iibsada si ay u kireeyaan) waxaa laga qaadi doonaa kharashka shaqada, oo ay ku jiraan deeqda dawlada.

Ma jiro xadi ay leedahay heerka kharashka guryahani, laakiin dib u gudida ikhtiyaarka ah ayaa la heli doonaa. Shaxda dhanka kale ayaa soo koobaysa ikhtiyaarada dib u gudida dhan oo ay heli doonaan dadka kiraystayaashu.



Dadkahaysta heshiiska kirada su'aalahabadanaa la iska waydiiyo

Maxay run ahaantii Dawlada Hoose ka qaadaysaa kharash dadka kiraystayaasha ah?

Kirooyinka RBKC ayaa ah kirooyinka ugu waawayn ee dahactirka lagu samaynayo. Tusaale ahaan, shaqada dayactirka waxaa kamid ah dabalak nidaamka laydhka toos ah kaas oo mid la isku keenayo diyaar ah. Qaybtan waxaa kamid ah dhamaan qaybaha dhismaha iyo hantida kuwaas oo loo yaqaan 'qaybaha caamka ah'. Hormark, sida, ku rakibida waxyaabo cusub dhismaha, sida wiish aan la dabaynaynin.

Qaybtee dhismaha ayaa ah qaybta dadka ka dhaxaysa'?

Kuwani waa qaybaha aan loo ogolayn dadka deegaanku inay kiraystaan laakiin dadka deegaanku ay xaqa u leeyihiin inay maraan oo waxa ay ku jirtaa dhismaha. Kuwan waxaa kamid ah laakiin ayna ku koobnayn, jidka, jaran jarada, albaabada laga soo galo, albaabada iyo daaqadaha guud, beebaka iyo laydhadhak dadka ka dhaxeeya.

Sidee ayay dadka kiraystayaasha ah loogala tashanayaa nidaamka shaqada mustaqbalka in la cayimo?

Maalgalinta mustaqbalka ee Lancaster West Estate waxay keeni doonaa Qaybta 20 Wada Tashiga dadka kiraystayaasha ah. Kani waa nidaan laba darjo oo wata tashi ah. Heer kasta dadka kiraystayaasha ah waxay fursad u heli doonaan inay kula 'socdaan' wixii ay dhamaystirayso dawlada hoose.

Sidee ayuu u shaqeeyaa Wada Tashiga Qaybta 20?

Wada Tashiga Qaybta 20 waxa uu bilaabmaa marka wixii kireeye qofka ah laga qaado kharashka shaqada qaybta wixii ka badan £250.

Marka kowaad, Wargelin Rabitaanka ah ayaa lasiinayaa kiraystaya taas oo samaynaysa nooca shaqada lagu taliyay. Kadibna taas waxaa ku xiga Wargelinta Qorshaha oo sheegeysa wadarta kharashka shaqooyinka, qandaraaslaha lagu taliyay iyo kharashka shakhsi ahaaneed.



Goorma ayaan ogaanaynaa wixii kharash ah ee la dib la iska qaadayo iyo kaan dib la iskaga qaadaynin?

La ogaan maayo ilaa wixii shaqo mustaqbalka ah la cayimo taas oo u sahlaya in si munaasab ah loo geliyo wixii kharash ah ee la qaadayo laakiin waxaa lagu xaqiijin doonaa in kaliya lagaa qaado shaqada uu xeerku iyo shuruucdu heshiiska kiradaadu ogol yihiin.

la xaqiijiyay kadib markii deeqda la kordhiyay

Ikhtiyaarada bixinta kharashka kiraystaha

Mudada bixinta kharashka	Yaa u qalba?	Sidee ayay u shaqaysaa?
12 bilood gudahood	Dhamaan kirada	Hadii aad lacagtaada iyada oo dhamaystiran bixiyo mudo gaar ah, waxaad heli doonoo boqolkiiba 2.5 qiimo dhimis hore u bixintaas ah
Laba sano gudaheed, oo bilaa ribo ah	Dhamaan kirada Tani waa mudada ugu badan ee lagu bixinayo ee la ay heli karaan dadka kiraystayaasha ah ee aan deganayn	Waxaad bixin doontaa kharashkaaga ilaa 24 jeer, mudo laba sano ah. Kharashka ugu yar ee bishii waxa uu noqonayaa £100
Sadex sano gudaheed, oo bilaa ribo ah	Dadka deegan ee heshiiska kirada haysta Gurigaagu waa inuu kaliya ahaadaa gurigaaga	Waxaad bixin doontaa kharashkaaga ilaa 36 jeer. Kharashka ugu yar ee bishii waxa uu noqonayaa £50
10 sano gudahood, bilaa ribo	Dadka deegan ee heshiiska kirada haysta Gurigaagu waa inuu kaliya ahaadaa gurigaaga. Kharashka badanaa shaqadu waxa uu noqonayaa £10,000	Waxaad ku bixinaysaa ilaa 120 jeer. Wax ribo ah la iskama qaadayo shanta sano ee kowaad. Kharashka waxaa la iska qaadayaa lix ilaa 10 sano taas oo ah xadi qiimo dhimis ah taas oo kala duwan marka la eego xadiga uu dejiyay Bank of England. Waxa aad bixinaysaa kharashka adeega si kharashka sharci ah aanu uga qaado gurigaaga. Wakhti danbe waa inaad bixiso ayay noqonaysaa kharash aad meesha kaga saarayso kharashka Dawlada Hoose

Sidee ayay Dawlada Hoose u xisaabinaysaa kharashka dayactirka oo sidee ayaa loo jajabinayaa taas oo ah kharashka kirada?

Wixii shaqo waawayn ee kharashkeeda la iska qaado waxaa loo xisaabinayaa si lamid ah kharashkaaga adeega maalin kasta. Tan waxaa loo xisaabinayaa iyada oo la isticmaalayo qaacidada qolka la miisaamay ee Dawlada Hoose:

- Miisaanka qolka guriga oo loo qaybiyay miisaanka qolka dabaqa sida 4/50ths ee kharashka shaqada.
- Kharashka xirfadlaha iyo maamulka ayaa qayb ka noqonaya xisaabinta.
- Wixii shaqo ah ee aan dib la iskaga qaado kiradan waxaa laga reebayaa xisaabinta.

Yaan talo madaxbanaan ula xidhiidhi karaa?

Waxaa jirta dhawr adeegyo tabo madax banaan oo kirada ah, sida Adeegyada Latalinta Qofka Heshiiska Kirada Haysta: www.lease-advice.org

Ka caawinta bixinta kharashka haystaha heshiiska kirada

Hadii aad ahayd qof deeganka ah ee heshiiska kirada haysta wakhtiga masiibada, waxaa jira ikhtiyaar kale oo kuu diyaar noqon kara oo kaa caawin karaa inaad bixiso kharashka qaybta ka hadhsan ee dib loo gudayo.

Waxaad u qalmaysaa inaad hesho dayn waajib ah ama dayn gaar ah oo Dawlada Hoose aad kaga hesho xadi ribo ah oo kale. Labada daymood waxaa kaliya la qaadan kartaa xadiga ah £500 ama ka badan waxaana lagu baahin karaa mudo sadex ilaa toban sano ah.

Daynta Dawlada Hoose

Daynta Waajibka ah: Waxaad aad deganayd kirada 10 sano waxaana lagaa qaaday wax ka badan £2,250 dayactirka waawayn. Daynta waxaa la socota ribo taas oo ah xadiga rahabka guriga maamulka deegaanka.

Daynta Gaarka ah: Waxaa lagaa qaadayay kharashka dayactirka waawayn. Waa inaad ribo ka bixisaa daynta oo mudada dayntaas lagaa sugayaana waxay ku xidhan tahay qiimaha qaansheegta. Dayntu waxay u badan tahay inay guriga loo rahmo oo kharashka waxaa la gelin doonaa hantida. Duwaanka dhulka waa loo sheegi doonaa oo hadii ay dhacdo markaa in guriga la iibiyo, inta soo hadhay ayaa laga bixin doonaa iibka. Waxaa sidoo kale jira ikhtiyaaro lagu heleyo kharash hantida ah.

Kharashka ikhtiyaarka ah

Hadii aad tahay qof degan ee heshiiska kirada haysta kaas oo hawl gabay ama laxaad la', waxaanu kuu heli kartaa kharashka gurigaaga, in kasta oo aanu kaaga fadhino inaad bixiyo kharashka sharciga iyo ribada la xidhiidha arrinkan. Waxaanu lacagta ka heli doonaa hantida la iibiyay ama la wareejiyay. Fadlan ogsoonaw waxaanu mar kasta kugu dhiiri gelinaynaa in aad doonato talo madax banaan kahor itna aan kharashka guriga aanad ku qorin.

Ikhtiyaaro dheeraad ah ayaa la heli karaa, oo ay ku jiraan dalbashada daynta bulshada bangiga ama dhismaha, barnaamijyada daynta iyo in lagu kordhiyo rahanka guriga oo wata rido dhaanta. Fadlan ogsoonaw waxaanu mar kasta kugu dhiiri gelinaynaa in aad doonato talo madax banaan oo maaliyadeed kahor inta aanad saxeexin wax heshiis maaliyadeed ah.

Waxaad sidoo kale heli kartaa ikhtiyaaro dheeraad ah oo *Shaqooyinka waawayn, tilmaamo kirada ah* buug ah.

Wixii macluumaadka dheeraad ah, fadlan la xidhiidh lancasterwestoffice@rbkc.gov.uk

Dib uhabaynta: Waa maxay talaabooyinka xigaayi?

Marka aanu ka gudubno heerka fikirka oo aanu u gudubno hordhaca nashqada, waxaanu bilaabaynaa qiimaynta khatarta danbka.

Qiimeeyaha danbu waxa uu samayn doonaa xog uruurino badan 15 ilaa 20 boqolkiiba hantida si uu nooga caawiyo in aanu xaqiijino in la helo heerka ugu badan ee badbadada inta lagu jiro nidaamka dib u habaynta, iyo in aanu helno sawir sax ah iyo qorshe hantida kala duwan ee guryaha ah. Dadka deegaanka waxay ka qayb geli doonaan dhibco siinta iyo magacaabista qiimeeyaha khatarta dabka, taas oo ilaa iminka 11 qof oo deegaanka ah ay wakhtigooda ugu deeqeen.

Waxaanu sidoo kale dhawaan samayn doonaa in aanu shaqaalaysiino makaanikiinta iyo khairrada laydhka, sidoo kale kooxda nashqada farsamada iyo nashqadeeya kowaad kaas oo hogaamin doona dhamaan dhinacyada caafimaadka iyo badbaadada. Waxaanu doonaynaa in aanu gaadho heerka magacaabiska khabiirto oo ay ka shaqeeyaan hantida ilaa Abriil 2020.

Sida lagu heshiiyay dadka deegaanka, qandaraasle kastaa waa la qiimayn doonaa iyada oo la adeegsanayo shuruudaha boqolkiiba 80 ee tayada, iyo boqolkiiba 20 ee kharashka, si loo xaqiijiyo in ay buuxiyaan baahiyaha kala duwan ee dadka deegaanka iyo inay awoodaan inay la shaqeeyaan dadka deegaanka oo ay gacan ka gaystaan heerka kowaad ee xulashada darajo kasta. Hadii aad doonayso inaad ka qayb gasho shaqaalaysiinta iyo doorashada qandaraaslayaasha, fadlan nagula soo xidhiidh iimeel ahaan lancasterwestoffice@rbkc.gov.uk



Laga bibaabo dhanka bidix, Linda Fenelon, Andrea Newton, James Rodrigues iyo Tomassina Hessel

Waa Kuwan Hogaanka Wada Shaqaynta Dadka Deegaanka

Waxaanu si wayn usoo dhawaynaynaa Hogaanka Wada Shaqaynta Dadka Deegaanka (REL) ee LWNT ee Cusub kuwaas oo loo abaabulay si ay uga caawiyaan dadka deegaanku inay ka qayb galaan barnaamijka dib u habaynta. 14 ruux ayaa soo dalbaday jagooyinka REL kuwaas oo lagu soo xayaysiiyay hantida oo dhan, waxaana ku jira Gudoomiyaha iyo Xoghayaha LWRA gudida.

Marka laga tago tamarta iyo khibrada ay kooxdeena usoo waaridi doonaan, magaabistan cusubi waxay ka dhigan tahay in kharash yar aanu ku bixin doono cid kale oo banaanka ah oo latalin ah in aanu kasoo qaadano, taas oo aanu lacag dheeraad ah u meel dhigi doono gurigaaga.

Waxaanu u wareegeynaa wajiga xiga ee nidaamka hagaajinta halkaas oo aanu u baahan doono in aanu macluumaad gaar ah kasoo uruurino dadka deegaanka ee dhisme kasta. Kooxdu waxay soo diraan doonaan oo ay qaban doonaan Guriga Furan iyo Aqoon Iswaydaarsi Mudnaanta ah kaas oo socon doona bisha soo socota si loo wada nashqadeeyo dadka deegaanka dib u haybta. Waxay sidoo kale kor u qaadi doonaa muuqaalka xidhiidhka bulshadeeda iyo wada shaqaynta hantida. Waxaad kala socotaa wixii waraaqaha casuumada iyo waraaqaha macluumaadka albaabkaaga iyo meesha lagu soo dhajiiyo wixii wargelin ah.

Hogaanka Wada Shaqaynta Dadka Deegaanka waxay ka ka shaqayn doonaan LWNT oo waxay qaban doonaan hawlaha soo socda:

- Inay la shaqeeyaan oo ay la xidhiidhaan dadka deegaanka - waxaana kamid ah kulan foolka fool ah, taleefanka, xog uruurin elektoroonig ah iyo baraha bulsahda ah

- In wixii wada tashi ah ee mashaariicda ahi ay qabsoomaan oo ay muujinayaan aragtiyada dhamaad dadka
- In si firfircoon dadka deegaanku ay uga qayb galaan dhamaan dhinacyada dib u habaynta
- Tirakoobka dhismaha iyo heshiisyada ikhtiyaarada kala duwan
- Samaynta qoraadala guudmarka ah iyo warbixinaya kadib marka nidaamka laga wada tashado
- In wada shaqayn lala yeesho oo hogaamin samaynta fursado lagu maalgeelinayo qaybaha munaasabka ah

Wakiilada guryuhu waxay ka masuul noqonayaan:

- Inay dadka deegaanka si dadban ugala shaqayaan soo uruurinta aragtida ee shaqada qorshaysan oo ay u sheegaan Kooxda Samaynta Dib u Habaynta LWNT iyo LWRA
- In dadka deegaanka la gaadhsiiyo wixii hormarka ah ee mashaariicda iyo shaqada qaybahooda iyo hantida kale ee balaadhan
- In wixii walaac ah iyo arrimaha ah ee la gaadhiisyo Kooxda Samaynta Dib u Habaynta iyo LWRA

Daaqad cusub oo lagu rakibi doono Asalka Istuudyaha

Dadka deegaanku waxay ka arki karaan daaqado kala duwna oo loo kala dooranayo barnaamijka dayactirka kaas oo lagu soo bandhigi doono Asalka Istuudyo gudaha ah.

Waxa jiri doona lix nooc oo kala duwan oo daaqado ah oo leh noocyo kala duwan oo furan iyo fireenyo lasoo dhigo. Daaqadahani waxay yeelan doonaan shaqooyin kala duwan oo loo sameeyay, dusha ay kasoo laadaaladaan, dhinac & leexan kara, gebi ahaanba dib u noqon kara oo dhinac qabana kara. Badhiga waxaa loo samaynayaa si dadka deegaanka ah fursad loogu siiyo ay ku arkaan sida ay u shaqeeyaan, su'aalo laga waydiiyo oo ay fikirkooda ka dhiibtaan.

Dadka deegaanku waxay ka qabsan karaan balan Hogaanka Wada Shaqaynta Dadka Deegaanka kaas oo ka talin doonaa oo tilmaamo ka bixin doona isticmaalka daaqadahan.

Daaqadahan csuub waxaa lagu rakibayaa guryo kala duwan dhismayaasha soo socda: Morland House, Upper Camelford Walk iyo Barandon Walk. Daawashooda waxaa la diyaar doonaa mar danbe.


Waxaanu yeelan doonaa ikhtiyaar in aanu la shaqayso shirkado isku jira si ay nooga caawiso qaab dhismeedka iyo rakibaada daaqadaha tijaabad ah.



Bidix: Tusaalayaasha daaqada lamid ah ee janjeedhka ah iyo leexda ee tijaabada lagu xidhay MidigL. Tusaalaha fireemka almuuniyeemka ah

Tani waxay noo ogolaanaysaa in aanu helno fursad aanu ku eegno heerka rakibaada, noocyada iyo qaababka daaqada aanu u xaqiijinayso in aanu heerka ugu sareeya gaadhsiino ikhtiyaarada iyo shaqooyinka shirkada ee ay dadka deegaanku doorteen.

Wixii macluumaad dheeraad ah ee tijaabada fadlan waxaad iimeel u dirtaa lancwestrefurb@rbkc.gov.uk ama waxaad eegtaa boga Instagram ee:

 @lancasterwestneighbourhoodteam

Yaraynta khalkhala, badinta taageerada

Marka uu bilaabmo barnaamijka dib u habaynta balaadhan waxaanu:

- 1** Xadidaynaa codka shaqada dhismaha oo laga dhigayo saacadaha shaqada marka laga reebo maalmaha todobaadkii fasaxa ah iyo ciidaha;
- 2** Waxaa la siinayaa xarumo maaliintii ah dadka ay saamayso;
- 3** Waxaa lasiin doonaa guryo madhan kuwa aadka ugu nugul.

Kadib marka laga helo dalabka LWRA, waxaanu eego doonaa hadii dadka deegaanka fursad loo siin karo in la wareejiyo kiradooda oo loo wareejiyo guri la dayactiray, kaas oo u sahlaya in baxaan gurigooda wakhtiga si ay uga yaraato khalkhalku.

Ma jirtaa wax talo ah oo kale oo aad hayso oo lagu yaraynayo khalkhalka? Fadlan noo sheeg adiga oo iimeel u diraya lancwestrefurb@rbkc.gov.uk



Qaabkeena cusub ee wada nashqadaynta

Si ay nooca caawiso in aanu garano mudnaan dadka deegaanka ee dhismayaasha kala duwan, waxaanu samaynay laba qaab oo loo wada nashqadaynayo xagaaga:

Munaasabada Guriga Furan iyo Aqoon Iswaydaarsiga Mudnaanaha.

Munaasabada Guriga Furan

Dhawrkii bilood ee lasoo dhaafay waxaa aanu ku qabanay sadex Guriga Furan, Verity Close, Barandon Walk iyo Treadgold House oo aanu kusoo bandhignay guri hal qol ah, laba qol ah iyo sadex qol ah.

Waxay ahayd fursad aanu ku turno dadka deegaan hormarka aanu ka samaynay dib u habaynta guryaha madhan iyo in aanu ka helno jawaab celinta anaka oo u sheegeyna shaqada mustaqbalka. Dhamaan sadex guri oo loo diyaariyay Qorshaha Kirada Deegaanka (LLP).

Jawaab celinta dadka kasoo noqotay Guriga Furan waxay ahayd mid aad u wanaagsan. Waxay ahayd talaabada kowaad ee heerka loogu samaynayay dhamaan guriga si loogu sameeyo qaabka Lancaster West qarniga 21aad. Waxaa dhici doonaa munaasabo Guriga Furan ah oo dheeraad ah dhawrka bilood ee soo socda ah marka waxaad la socotaa wixii cusub.

GUUDMARKA FIKIRADA

Aragti Isku Dhaw Guriga halka qol ah



Waxa sida wanaagsan u qabsoomay

Fikir uruurinta suuliga, madbakha, iyo dhamaystirka guriga waxa uu ahaa mid aad u wanaagsan. Dadka deegaanku waxay sheegeen in shaqadu ahayd heerka ugu wanaagsan.

Dadku waxay si gaar ah uga heleen shaqada looxa adag ee dhulka, albaabka loogu talo galay ee dabka iska caabinaay, meesha muuqada, iyo sidoo kale bulaacada iyo heerkulka. Suulyada ayaa si gaar ah loo aqblaya taas oo leh fadhiga, suulida, baadhka, iyo marmarka.



Aad iyo aad ayuu u wanaagsan yahay oo ma moodid guryaha bulshada!

Aad ayuu cajiib u yahay, waan ka heley!

Iswiijka iyo kulayliyuhu aad ayay u cajiib yihiin waan ka heley dhamaan albaabada.



Waxa hormarka lagu samayn karo

In kasta oo dadka deegaanku ay aad uga heleen guud ahaan heerka shaqada, waxay walaac ka muujiyeen hawo saarka, oo sidoo kale waxay muujiyeen inuu yaraaday meelaha banaan ee guryuhu, gaar ahaan agabka madbakha,

Waxaanu ka qaadnay dhamaan fikirka oo waxaanu geliney nashqada cusub ee guryaha heerarkooda oo waxaanu isla eegnay dayactirka guud.



Waxaa loo baahan yahay saacad casri ah! Dadka ayaa kharash gareeyay oo waxaa soo gaadha kharash badan kahor inta ayna bixinin.

Halka ay mashquulka yihiin dhawr ayaa geliyay mishiinka weelka lagu maydho ama qalajiye?



64

inta jawaab ee nasoo gaadhay

85+

inta qof ee kasoo qayb gashay

9.2/10

qiimaynta booqdayaasha munaasabada

250

aragtida baraha bulshada



Munaasabada Guriga Furan

Waxaad macluumaad dheeraad ah ka ogaataa

Waxaad ka akhriyi kartaa warbixin dhan ee fikirada WeAreW11 app – ee boga 16.

GUUDMARKA FIKIRADA

Barandon Walk Guri laba qol ah



Waxa sida wanaagsan u qabsoomay

Dadka deegaanku waxay aragti wanaagsan ka bixiyeen tayada iyo nashqada dib u habaynta.

Jawaab celintu waxay ahayn mid wanaagsan wixii ku saabsan mabdakha iyo suuliga Gaar ahaan, dadka deegaanku waxay ka heleen qasabada madbakha kaas oo leh mid lagu rusheeyo, waxay isdhax geliyeen agabka, kariyaha, iyo marooxada banaanka, isku darka tuushka/barkada maydhiga iyo istijada.

Dad yar ayaa sheegey in la badalo albaabka hore oo lagu balado mid muraayad ah oo sida qolka fadhiga oo kale ka laga galo ah. Dadka deegaanku waxay sheegeen in gurigu u eekaaday mid fudud oo iftiimyada oo casri oo daray inuu u eekaaday.



Crisp décor iyo meel wanaagsan oo la isticmaali karo.

—
Suligu wuu wanaagsan yahay.

—
Aad ayay cajiib u tahay, aad ayay u qurux badan tahay oo hormar wayn ayaa lagu sameeyay marmarka.



Waxa hormarka lagu samayn karo

Dadka qaar ayaan ka helin cabirka iyo goobta kulayliya biyaha la dhigay ee ka danbeysa labada albaab ee qolka fadhiga, iyo sidoo kale yaraanta sirta ee barandada jirta.



Ranjigu waa inuu noqdaa mid la maydhi karo.



113

inta jawaab ee nasoo gaadhay

126

inta qof ee kasoo qayb gashay

9.2/10

qiimaynta booqdayaasha munaasabada

495

aragtida baraha bulshada

Munaasabada Guriga Furan

Ka qayb gal

Waxaa dhici doonaa munaasabo Guriga Furan ah oo dheeraad ah dhawrka bilood ee soo socda ah - markaa waxaad la socotaa wixii cusub.

GUUDMARKA FIKIRADA

Guriga Treadgold Guri sadex qol ah



Waxa sida wanaagsan u qabsoomay

Guriga Furan ee Treadgold waa munaasabad ayay dadka deegaanku ka heleyaan fursado ay ku booqan karaan guryo dadka soo dhawayn leh taas oo lagu heli karo LLP. Dadka deegaanku ee timaaday aad ayay ugu farxeen tuusha la dhax galayo, gaar ahaan dadka qoyska ee aan dhaqdhaqaaqi karin.

Dadka kale ayaa sidoo kale si wanaagsan u arkay albaabka dabka, nidaamka kulayliyaha, daaqadaha iyo qurxinta. Sidii munaasabadihii Guriga Furan ee hore, fikirka dadku ka dhiibteen mid wanaagsan ayuu ahaa wixii guriga lagu rakibayo waxyaabaha lagu rakiyo oo ay kamid yihiin laydhadhka, talaagada iyo qaboojiyaha la is dhaxgeliyay iyo laydhadhka hore.



Waxa aad moodaa guriga fasax.

Waxaad moodaa inaad heerkulka qolalka si gaar ah u maamuli karto.

Madbakha waxaa laga dhigay mid shakhsi ahaaneed.



Waxa hormarka lagu samayn karo

In kasta oo fikirka dadka naga soo gaadhay guud ahaan uu wanaagsanaa wixii ku saabsan heerka iyo dhamaystirka dadka qaar ayaa walaac ka muujiyay meesha oo yar qolka fadhiga oo waxay u arkayeen in barandada laga faa'idaysan karayay si loo sameeyo meel dheeraad ah. Dadka kale ayaa sidoo kale u arkayay inay tahay wax lala yaabo in aanu bulaac lahayn suuligu.



Ikhtiyaa badan oo midabka ah ma heli karnaa?



137

inta jawaab ee nasoo gaadhay

89

inta qof ee kasoo qayb gashay

9/10

qiimaynta booqdayaasha munaasabada

Aqoon iswaydaarsiga Mudnaanta wada nashqadayn heer dhisme

Dhawrka bilood ee soo socda, waxa aanu samaynay Aqoon Iswaydaarsi Mudnaanta ah iyo wada shaqayn socodka ah oo dhisme kasta ah oo dhamaan dadka deegaanku ay ku heleyaan fursad ay ku sheegayaa shaqada ay doonayaan in laga qabto guryaha.

Dadka deegaanku waxay ka wada hadli karaan kharashka shaqada iman karta oo waxay mudnaanta ku siinayaan miisaaniyada la heley. Aqoon iswaydaarsigeena kowaad waxaa lala qabtay dadka deegaanka Verity Close Juulay.



Xidhnaanshaha Kala Duwan Aqoon Iswaydaarsi

Dadka deegaanka ee ka qayb geley Aqoon iswaydaarsiga Verity Close waxay la yimaadeen laba liis si ay u eegaan mudnaanaha kala duwan ee dadka degan kuwaas oo degan guryaha iyo kuwa degan dabaqyada. Kan waxaa lagu qabtay wada hadal miiska ah kaas oo ay fududeeyeen hogaanka wada shaqaynta dadka deegaanku.

Hogaanka wada shaqaynta dadka deegaanku waxay sidoo kale uruursheen fikirka kadib aqoon iswaydaarsiga taas oo ahayd iimeel, fariin qoraal ah iyo foolka fool iyada oo la garaacayo albaababa si tirada ugu badan loo gaadhsiyo dadka ku jira oo loo xaqiijiyo in kuwa aan awoodin ay ka qayb galaan oo ay sheegi karaan aragtidooda.

Aqoon iswaydaarsi dheeraad ah ayaa loo qabtay dadka deegaanka ee Camelford Court, Treadgold House, Barandon, Hurstway iyo Testerton Walk. REL keenu waxa uu isku dari doonaa natiijada aqoon iswaydaarsiyada oo waxa uu waraysan doonaa dadka deegaanka ee iman kari waayay munaasabada.

Warbixinta dhamayskatiran waxaa la gelin doonaa oo laga akhriin doonaa app-ka W11 - eeg boga 16.

Kharashka din u habaynta Verity Close iyo darajo siinta aqalada dabaqyada ah

Maya	Shaqooyin	Qiyaasta Kharashka
1	Madbakh	£747,000
2	Suuli	£258,000
3	Nidaamka soo gelida albaabka, laydhadh	£105,000
4	Bulaacada dhulka hoosteeda ah	£251,000
5	Cod baajiye, looxa dhulka iyo looxaan	£338,000
6	Daaqado	£1,400,000
7	CCTV	£29,000+
8	Saqaf	£1,800,000
9	Kulayliye	£344,000
10	Ikhtiyaarka inta xidhan dib loogu nashqadaynayi	£812,000

Kharashka din u habaynta Verity Close iyo darajo siinta guryaha

Maya	Shaqooyin	Qiyaasta Kharashka
1	Cod baajiye, looxa dhulka iyo looxaan	£338,000
2	Madbakhyo	£747,000
3	Suuli	£258,000
4	Dib u cusboonaysiinta kulayliyaha	£344,000
5	Laydhadh, fiishash dheeraad ah, (laydha meesh dadku maraan)	£338,000
6	Albaabka lagu xidhayo	tbc
7	Albaabka meesha laga soo galo iyo laga baxo	tbc
8	Ka jawaabida xaalada qasabadaha	tbc
9	Bulaacada dhulka hoosteeda ah	£251,000
10	CCTV	£29,000+

Yaraynta raadkeena kaarboonka

In loo wareejiyo guryaha iibiyayaasha tamarta cagaaran ee ugu balaadhan Ingiriiska iyo sidoo kale kaxaysashada gaadiidka laydhka ku shaqeeyaa iyo baaskiilada sida kuwa sadexda taayar leh, ayaa ah qaar kamid ah barnaamijyada lagu doonayo ee ay wado LWNT si loo yareeyo raadkeena kaarboonka ee aynu reebeyno.



Maxaynu ka qabatay ilaa iminka Kooxda Xaafada Lancaster West:

- Inay shaqaalaysiiyaan shaqaale dheeraad oo deegaanka ah, la yareeyo wasakhda kaarboonka ee bulshada.
- La iibsado laba gaadhi oo laydh ah oo kooxda dayactirkeena.
- In la sameeyo beero iyo barnaamijyo ka kooban qaar kamid ah beeraha deegaanka mashaariic ah oo ay ku jiraan Talbot Grove House.
- Ku rakibiada laydhka dareemaha ee xafiiskeena bakhtiinta ee marka qolalka aan la isticmaalaynin.
- Waxaa loosoo iibiyay baaskiilada dayactirka si ay u qaado kooxda dayacrirka wixii alaabta culus ah guryaha dhaxdooda.

Waxaanu si dhaw ula shaqaynayn kooxda ka socota London School of Economics iyo iyo Deeqda Tamarta Wax ku Oolka ah ee Duqa si loo keeno teknooloojiyad bay'ada u wanaagsan oo lagu rakibayo guryaha - oo lagu yaraynayo tamarta iyada oo la adeegsanayo farsamo lagu yaraynayo shidaalka.

Waxaanu qabanaynaa qaybteena barnaamijka dib u habaynta guryaha:

- In badalo cida laydhka noo shida guryaheena dib u habaynta lagu sameeyay ee diyaarka u ah in la kireeyo oo loo wareego Bulb, shirkada ugu balaadhan Ingiriiska ee tamarta cagaarka ah iibsaa.
- In la rakibo nidaamka kulaylka Nest thermostat kaas oo lagu rakibo teknooloojiyad habdhismeed taas oo tamarta yaraysa marka aanu qofna samaynin.
- In la yareeyo laydhka LED kaas oo iminka yareeya tamarta khasaaraysa.
- Methven tuush ah si loo yareeyo isticmaalka biyaha.

Waxaanu qorshaynaynaa inaanu samayno barnaamijyo dheeraad ah mustaqbalka oo waxaanu soo dhawaynaynaa talooyinkiina.



Wixii macluumaad dheeraad ah fadlan la xidhiidh: lancasterwestoffice @rbkc.gov.uk

Xadiga ku qanaca ugu sareeya ee dayactirka LWNT

Waxaanu mar kale aragnay ku qaneecada ugu badan ee dayactirka LWNT.

Dadka deegaanku waxaan ka helney qaneecadii ugu badnayn oo ah boqolkiiba 95, oo waxay ku qiimeeyeen dayactirka Sebteember, wax aad uga badan inta ay waaxdu tahay.

Wax ka badan boqolkiiba 80 dhamaan shaqooyinka waxaa sameeyay kooxda guryaynta; waxaana ay noqotay ka jawaabida dayactirku celcelis ahaan 2.2 maalmood dhamaan dayactirka. Waad ku mahadsan tihiiin jawaab celinta wanaagsan.


Xog uruuriinta qaneecada macmiilka waxaa sameeyay shirkad madaxbanaan ee Kwest. Waxay la hadasha dadka deegaanka kuwaas oo shaqo dayactir ah dhawaan loo qabtay si ay wax uga waydiiso wada ay uga soo taagnaayeen. Marka ay macquul tahay waxaa la qaaday jawaabtaada iyo fikrikaaga si hormar loo sameeyo.

Hadii aad wax mushkilad ah kula kulanto gurigaaga waxaan halkan ku joognaa inaanu ku caawino. Waxaad u sheegi kartaa dayactirka adiga oo lasoo hadalaya **0800 389 2005** ama usoo diraya iimeel **lancasterwestoffice@rbkc.gov.uk**

SEBTEEMBER


95%

oo dedka deegaanka Lancaster West waxay ku qanceen dayactirka



2.2 maalmood

Wakhtiga lagaga jawaabayo dhamaad dhayactirka



Ka hortaga cufka

Waxaad la socotaa samaysanka cufka gurigaaga marka heerkul oo hoos u dhaco.

Waxaad u ogolaataa in hawo daray ah soo gasho qolalka adiga oo furaya daaqadaha taas oo kaa caawin kara qoyaanka samaysmaya ahaan marka aad wax karinayso ama maydhanayso ama aad wixii aad maydhay ku qalajinayso raadhiyeetarka. Qolalku waxay u baahan yihiin meel hawo ku wareegto, firidhsanaanta ayaa sidoo kale cufka ka qayb qaadan karta.

Xaalada ugu daran, hadii aan laga jawaabin waxay keeni kartaa ceeryaan samaysanta.

Whirlpool ayaa badashay alaabaad: wax ku ool ma tahay?



Whirlpool ayaa dhamaan badashay qaar kamid ah alaabaadkeeda kadib markii dib u eegis lagu sameeyay tilmaamaha soo saarida.

Alaabta ay bashay waxa ay gaar u ahayd wax kamid ah alaabaadka soo socda kuwaas oo la sameeyay intii u dhaxaysay Abriil 2004 iyo Sebteember 2015; Hotpoint, Indesit, Swan, Proline iyo Creda noocyada ah ee hawada kaydiya iyo qalajiyaha tumble ee faama laydhka.

Hadii aad haysato wax kamid ah agabkan, fadlan la saar qalabkaas fiishta sida ugu dhakhsaha badan oo ha isticmaalin.

Waxaad kala xidhiidhi kartaa Whirlpool 0800 151 0905 si uu

farsamo yaqaan kuugu yimaado gurigaaga oo uu wax ka badal kuugu sameeyo si bilaash ah. Waxaad sidoo kale ka heli kartaa macluumaad dheeraad ah adiga oo booqanaya websaytyada soo socda:

▶ <http://safety.indesit.eu>

▶ <http://safety.hotpoint.eu>

▶ <http://safety-swan.eu>

▶ <http://safety.hotpoint.eu>

Wixii macluumaad dheeraad ah, fadlan booqo waxaad la hadashaa Kooxda Maamulida Guryaynta 0800 389 2005 ama waxaad u dirtaa iimeelkaaga **lancasterwestoffice@rbkc.gov.uk**

Bixinta kharashka biyaha ee Thames Water

Isbadalka dadka deegaanka ee bixinaya kharashka biyahooda ee Thames Water waxa auu bilaabayaa 30 Sebteember.

Dadka deegaanku waxay ka heli doonaan bushqada macluumaadka ee Thames Water. Hadii aanad wax macluumaad ah ka helin Thames Water, markaa fadlan la hadal **0800 009 4238**. Waxada sidoo kale kala hadli kartaa la taliye oo waxaad kala hadli karaa qorshaha ugu wanaagsan ee qoysku ku bixin karo. Waxaad sidoo kale iimeel ugu diri kartaa Thames Water **customerservices@thameswater.co.uk** oo waxaad dalban kartaa bushqada macluumaad ah in toos gurigaaga laguugu soo diro. Hadii aad bixiso iyada oo aad toos ugu shubayso waxaad ka heli doontaa warqad RBKC muujinaysa lacagtaada wax ka badalka lagu sameeyay.



Ilaalo Cusub oo amaan Habeenkii ah oo guryaha ah

Dhaawaanahan waxaa nasoo gaadhayay warbixino habdhaqan lidi ku ah bushada (ASB) oo habeenkii guryaha ah. Si aanu uga jawaabno taas, waxaanu kala shaqaynaynaa Community Wardens inay samayso kormeer lug ah oo guryaha ah habeenkii.

Dadka wareegayaa waxay xidhaan doonaan dirays dameeri ah waxaana ay u shaqeeyaan Garde oo waxay bilaabi doonaan wareegooda 5 galabnimo. Waxay si firfircoon u uruurin doonaan macluumaadka ASB oo waxay meesha ka saari doonaan wixii khalkhal keenaya. Waxay sidoo kale xidhaan doonaan kameerada laabta si loo xaqiijiyo in dhamaan daddooyinka la duwaan geliyo.

Community Wardens waxay sidoo kale la shaqayn doonaan St Giles Trust si ay dadka deegaanka ula shaqeeyaan oo ay u ogaadaan

sababaha qaar jira ee kooxaha habeenkii ay iskugu iman karaan oo ay u khalkhalin karaan xaafada. Dadka deegaanku waxay si toos ah ula xidhiidhi karaan **07940 171 144** si ay uga warbixiyaan dhacdooyinka si sir ah si ay u baadhaan.

Tani waxay ku xadidnaan doontaa wakhti xalinteeda ASB wixii ah ee guryaha ah oo waxaa lagu xaqiijin doonaa inay dadka deegaanku dareemaan badbaado. Hadii aad qabto wax su'aal ah, fadlan nagala soo xidhiidh **0800 389 2005** ama iimeelka **lancasterwestoffice@rbkc.gov.uk**

Waxaanu wakhti xaadirkan leenahay CCTV yo badan iyo kameerada la qaado oo lagu rakibay meelo la yaqaan oo waxaanu kala shaqaynaynaa bilayska joojinta ASB iyo danbiyada ka dhacaya guryaha.

Tilmaamaha aad barandadaada ku ilaalinayso baadadeeda

Sida aad la socoto, waxaa jirta barando kale oo dab qabsaday 23 Agoosto oo ah Guryaha Silchester. Dadka qaarkood ayaa ka qashay guryahooda.

Waxda dab damisku waxay sheegeen in dabka uu keeney loox iyo waxyaabaha huriyada dabka oo barandada yaalay, kuwaas oo dab qabsaday.

Si aad u ilaaliso amaanka iyo badbaadada dadka deegaanka ah ee Lancaster West Estate iyo Bramley House, waxaanu ka dalbanaynaa dhamaan dadka degan inay fadlan raacaan shuruucda hoose:

- ✗ In aanad xaabo dhicin barandada, ama looxaan
- ✗ In aanad waxba ku dubanin ama ka tuurin sigaar gurigaaga
- ✗ Waxyaabaha holca in aanad dhigin barandada (xaabada, waraaqo, waxyaabaha guud)
- ✓ Inaad ka qaadi wixii alaab ah ee badan barandadaada kuwaas oo keeni kara in hawadu bixi waydo ama ay laga bixi kari waayo hadii uu dhaco dab
- ✓ Inaad alaabta ka guryo barandooyinka ee wixii jalxado aan meesha ku dhajisnayn ah, kuwaas oo ku dhici kara dadka hoos maraya

Maamulaha Xaafada ee guryuhu waxa uu la socon doonaa barandooyinka, oo waxa uu kuugu iman karaa booqasho uu kaagala hadlayo heerka la ogol yahay iyo in la xaqiijiyo in dadka deegaanku ayna ku xad gudbin wixii ku qornaa heshiiskooda kirada.

Waxaanu doonaynaa in aanu kala shaqayno dadka deegaanka oo aanu ka caawiyo inay ka qaadaan wixii alaab badan ah barandada oo ay laga jaro wixii albaab dheeraad ah ee amaan ah albaabka hore. Hadii aad doonayso inaad dalbado kaalmo ama aad ka hadasho kuwa sare, markaa fadlan nagala soo hadal **0800 389 2005** ama iimeelka **lancasterwestoffice@rbkc.gov.uk**



Nabadgalyaynta Steve

Steve Jacobs, maamulaha xaafada kowaad ee Lancaster West Neighbourhood Team, waxa uu inaga tagayaa Guga, kaas oo laba sano la shaqaynayay dadka deegaanka kadib markii ay dhacday masiibadii Grenfell Tower. Waxa uu qoray:

"Waxa ka dhacday masiibo xun Grenfell Tower taas oo aan ku bartay dad badan oo degan kuwaas oo markii danbe aan jeclaaday oo aan qadariyo. Aniga waxay ii ahayd khibrad nololshada badasha. Waxaan rajanaynaa in aan gacan ka gaystay waxoogaa kasoo kabashada bulshada dhan laakiin waxaan fahansanahay in weli jidku dheer yahay kaas oo kaliya iminka bilaabmay. Waxaan xasuustaa maalinta kowaad ee aan bilaabay Xafiiska Xaafada Lancaster West kaas oo ahaa qol kaliya oo ku Yaal Qaybta Hoose. Iminka waa hay'ad xarun dadka deegaanka ah oo ay ka shaqeeyaan koox hibo leh, oo ay hogaamiyaan dadka deegaanku. In kasta oo aan ka tagayo, waxaa ii qorshaysan in aanan xidhiidhka goynin oo aan bixiyo wixii kaalmo ah ee aad u aragtaan inaan mustaqbalka aan bixin karo. Dhamaantiin wax wanaagsana ayaan idiin rajaynayaa."

Maamulaha Xaafada James Caspell waxa uu raaciyay: "Waxaan doonayaa in aan u mahadnaqo Steve shaqada wanaagsan ee uu qabtay iyo diirad saarida dadka deegaanka intii uu ka shaqaynayay guryaha, gaar ahaan wakhti yar kadib markii ay dhacday masiibada Grenfell Tower. Waxa uu usoo waaridey tamariyo fikiro kooxda, oo waxaan ogahay inay xasuusan doonaan dadka deegaanku iyo shaqaaluhu."

Oo bulsho oo dhaadheer ayaa lagu xidhan inta ku teedan Grenfell Walk


Rako laga soo qaaday tareenka ayaa loo isticmaalay si loogu sameeyo rako dhirta lagu beeryo oo ku taal aaga Wadada Istaanka ee tagta Grenfell Walk.

Maarso dadka degan Barandon, Testerton, Hurstway iyo Grenfell Walk ayaa lagu soo casuumay inay ka qayb galaan awoon iswaydaarsi kahor inta aan dib loo furin Grenfell Walk. Dadka deegaanku waxay noo sheegeen inay doonayaan in hormar lagu sameeyo oo la sameeyo deegaan badbaado ah oo soo dhawayn leh. Kadib dalabka dadka deegaanka, in la qaato wixii looxaan ah ee aan loo baahnayn ee tareenka si looga sameeyo rakada beerta ayaa lagu rakibay oo xaaga dib loo isticmaalo ayaa lagu daray si deegaanka loogu qurxiyo.



Appka guryaha ee cusub WeAreW11

Hadii aad u baahato dayactir, inaad bixiso kiradaada ama aad wax ka ogaato waxa ka socda xaafada? Waxaad soo dejisataa app-ka la wada sameeyay ee WeAreW11 ee ay sameeyay dadka deegaanka guryaha. Waxaad ka heli kartaa App Store ee Apple iyo Android. Waxaad ka balansan kartaa dayactir gurigaaga ah ama xidhmo, waxaad ka raadsan kartaa shaqo iyo fursado tobobar, oo waxaad la socon kartaa dhacdooyinka cusub iyo wararka guryaha.



Sabuurada wargelinta ee guryaha oo dhan ku taal

Waxaad arki kartaa Rebecca Razza oo degan meesha oo macluumaadka cusub ku dhajinaya sabuurada wargelinta guryaha oo dhan ku taal. Rebecca waxaa weeye kaaliya xidhiidhka cusub ee guryaha. In kasta oo lagu jiro wakhtigii dhijitaalka ah, dadka deegaanku hadana waxay sheegeen inay wax ka eegaan sabuurada wargelinta. Waxaanu wakhti xaadirkan kala shaqaynaynaa dadka deegaanka meelaha ugu wanaagsan ee lagu dhajin karo sabuuradaha wargelinta. Waxaanu qorshaynaynaa sadex meelood oo lagu sameeyo, cabirka iyo sida ay u eeg yihiin.



Ma ku hadashaa luuqad labaad?

Waxaanu qorshaynaynaa in aanu samaysano adeega turjubaada oo inaka inoo gaar ah. Hadii aad ka tirsan tahay dadka degan guryaha oo aad doonayso shaqo dabacsan inay qabtaan oo doonay inay bixiyaan adeega turjubaada oo ay siiyaan dadka deegaanka qaba wixii caqabad ah ee luuqadeed waxaanu jeclaan lahayn inaad nala soo xidhiidho. La xidhiidh khadra.ibrahim@rbkc.gov.uk

Taageerada daryeelka ilmaha

Ma tahay waalid doon doonaya shaqo, tobobar ama fursad aad wakhtigaaga ku deeqo oo kaa caawisa inaad shaqada ku noqoto? Ma leedahay caruur yaryar laakiin daryeelku ma kugu yahay caqabad? Waxaanu doon doonaynaa taageero waalid ee dadka deegaanka ee degan guryaha. Wixii macluumaadka dheeraad ah, fadlan la xidhiidh khadra.ibrahim@rbkc.gov.uk

Deeqda New Grenfell

Waxaa jira £600k oo sanadkan la heli karo (2019/20) oo loogu talo galay hay'adaha deegaanka, ururdada dadka deegaanka iyo kooxa si ay u bixiyaan maraashiicda aaga ay saamaynta ku yeelatay masiibadii ee New Grenfell.

Mashruucan cusub waxaa loo qorsheeyay inuu dadka deegaanka siiyo fursado ay kaga hadlaan mashruuca deegaanka ah ee ay tahay in la maal geliyo si loo xaqiijiyo in guushu ay waafaqsan tahay baahiyaha dadka deegaanka.

Horaantii sanadkan Dawlada Hoose waxay kala hadashay dadka deegaanka iyo hay'adaha wixii ku saabsan sida ay doonayaan in loogu guulaysto Deeqda Mashruuca.

Bulshadu waxay sheegtay in ay doonayaan in la sameeyo barnaamijyo ka hadlaya waxyaabaha soo socda:

Badqabka caruurta, dadka dhalinyarta ah ama dadka waawayn

Fursado waxbarasho oo kor loogu qaadayo xirfadaha, aqoonta, iyo xirfada shaqo

Munaasabo bulsho iyo dhaqan taas oo ay bulshadu iskugu imanayso oo ay ku kordhinayso xidhiidhka dhamaan bulshada, oo ay ku jiraan barnaamijka lagu yaraynayo go'doonka dadka waawayn

Badbaadada bulshada

Hawlaha dadka dhalinyarta ah

Beershada cuntada iyo hawlo cuntada ku salaysan kuwaas oo kordhinaya isku imaatinta bulshada oo kor u qaadayo deegaanka.

Kadib markii fikirkan laga heley, ururada dadka deegaanka, hay'adaha iyo dadka ay la shaqaynayaan waxay soo gudbiyeen/duwaan geliyaan waxa ay doonayaan inay dalbadaan ee deeqda lacageed horaanta Noofember.

Dadka laga soo xulay kuwaas ayaa loo keeni doonaa dadka deegaanku inay go'aamiyaan dhaco maalin la qaban doono waxyar kadib Doorashada Guud.

Dhamaan wixii soo dalbaday waxay u soo bandhigi doonaan mashaariicdooda dadka deegaanka kuwaas oo kadibna fursad u heli doona inay u codeeyaan mashruuca ay doonayaan.

Wixii macluumaad dheeraad ah iimeel ugu dir **NKengagement@rbkc.gov.uk**



Farsaxanka Bulshaxa ee Xuska Grenfell: Wajiga Labaad

Farshaxankii kowaad waxaa lagu dhijiyay sayska Grenfell Tower. Caleemaha waxaa sameeyay dadka deegaanka ah kuwaas oo ka qayb qaatay aqoon iswaydaarsiga la qabtay sadexda maalmood Sebteember ee wajiga labaad ee mashruuca Farsaxanka Bulshaxa ee Xuska Grenfell.

Caleemuhu waxay leeyihiin 72 faraafyo oo dahab ah, kuwaas oo mid kastaa sheegayo wixii la waayay 14 Juulay 2017. Waa kii ugu horeeyay 24 caleemood oo lagu xidhayo labada sano ee soo socda .

Wixii macluumaad joogta ah kala soco @Almanaar/mchc and @ACAVAFourish

Hagaajinta goobta Grenfell Tower

MHCLG ayaa la wareegtay mulkiyada goobta Grenfell Tower 15 Juun 2019. Qof kaliya ayaa lola xidhiidhayaa wixii macluumaad ah grenfelltowersite@communities.gov.uk

Weli way tar yahay gaadiidka geli kara geerashka Lancaster West waana in laga balansadaa Kooxda Maamulka Goobta iyada oo lagala xidhiidhayo iimeelka sare ama lala hadalayo 07920 534 378.

Hadii aad macluumaad dheeraad ah u baahan tahay, nalaha soo xidhiidh 0303 444 0011 ama boogo websaytkeena wixii macluumaadka ugu danbeeyay ah: www.gov.uk/government/topical-events/grenfell-community-updates

Wada shaqaynta kaydka cuntada



Waxaanu iminka duwaan gelinay arrinka kaydka cuntada fagtuurada ah ee bulshada, kaas oo lagu isticmaalayo kaydkeena cuntada ugu dhaw ee Notting Hill Methodist Church, 240 Lancaster Road. Kaydka cuntada kiniisadu waxay qayb ka tahay Trussell Trust, waxa la furay Oktoober oo waxa ay u furan yihiin dadka deegaanka Kensington iyo Chelsea. Lacagta lagu deeqay waxa la keeni karaa kiniisada. Taariikhaha kaydka cutadu waa: Talaata 11 duhurnimo ilaa 1 duhurnimo iyo Jimce 1 duhurnimo ilaa 3 galabnimo.

Si aad macluumaad dheeraad ah uga hesho wixii ku saabsan fagtuurka, sida loo heli karo fagtuur iyo nooca cuntada nadiifta ah ee loo baahan yahay, waxaad ka heli kartaa www.kensingtonchelsea.foodbank.org.uk. Wixii macluumaadka ah iimeelka: info@kensingtonchelsea.foodbank.org.uk

Xarunta Bulshada cusub ee Guryaha Lancaster West

Ururka Dadka Deegaanka Lancaster West ayaa la wareegey maamulida xafiiskii hore ee TMO Julaay oo waxay u isticmaalayaan xarun cusub oo bulsho oo guryaha ah.

Xarunta Bulshada Guryaha Lancaster West (LWECC) waxay wakhti xaadirkan la shaqaynaysaa adeegyo kala duwan iyo hawlo oo ay ku jiraan kooxaha dugsiga kadib,

duug duugista ilmaha iyo fasalo alamiitada kursiga ah. Bunka aroortii ayaa la sameeyay dhawaan oo kooxda qadada ee dadka waawayn ayaa sidoo kale wada.

Wixii macluumaad ah ee dheeraad ah booqo www.lancwest.com ama waxaad la xidhiidhaa info@lancwestra.com



Hawlaha barnaamijka ee Xarunta Bulshada Guryaha Lancaster West

RISE koox waxbarashada kadib ah

BILAASH

Isniin, Arbaco iyo Khamiis Kasta, da'aha 7-114 galabnimo ilaa 6 galabnimo

Koox cusub oo dugsiga kadib ah ayaa la sameeyay oo la ay maal gelinaysaa People's Health Trust iyada oo ay iska kaashanayaan Ururada Dadka Deegaanka Lancaster West .

Barnaamijyada waxaa kamid ah madalo lagaga shaqaynayo layliska guriga, farshaxan iyo geemam, alamiito, jimicso iyo waxyeebo kale. Kadib markii ay waalidku talo ka dhiibteen, waxaa la sameeyay qorshe madalo cunto karin ah sidoo kale adeegyada soo qaadida halkaas oo xubnaha shaqaalaha RISE ay ka qaadi doonto caruurta dugsiga oo ay u kaxayn doonaan madasha.

Wixii macluumaadka ah fadlan nagala soo xidhiidh **07944 280 655** ama iimeelka info@lancwestra.com ama youthgroup@rise.org



Caafimaadka iyo Xooga

BILAASH

Khamiis Kasta 10 subaxnimo ilaa 12 duhurnimo



Alamiito ku salaysan saacad kursiga ah oo ka caawinaysa cuncunka caamka ah iyo xanuunka oo ay bixiyaan hormoodka bulshadu oo ay kala shaqeeyaan Age UK. Wixii balansi ah iyo macluumaadk dheeraad ah, fadlan kala xidhiidh Ewa **07961 232 431** ama Kate **020 3181 0002**.

Bunka aroortii

BILAASH

Isniin kasta, da' kasta ayaa iman karta 10 subaxnimo ilaa 12 duhurnimo

Kaalay oo la kulan jaarkaaga, waxaad aragtaa xarunta bulshada oo waxaad la wadaagtaa fikirkaaga ku saabsan munaasabada iyo halwala aad doonayso inaad aragto. Wixii macluumaad dheeraad ah, fadlan kala xidhiidh Fiona **07852 550 601**.

Ilmaha iyo aniga

BILAASH

Salaasa Kasta 10 subaxnimo ilaa 11.30 duhurnimo



Madal madadaalo ah, oo qaab xanaano oo kale ah oo waalidka iyo caruurta aan weli lugaynin ah. Xarunteena Maternity Champions ee qoysku waxa ay halkan u joogtaa inay dhagaysato oo ay ku taageerto adiga, oo ay ku siiso macluumaadka adeegyada deegaanka. Madashada waxaa ku jira heesid, abuurid ruwaayado, wakhti sheeko iyo fursad aad kula kulanto waalid kale, oo adiga oo kale ah.

Waxaanu ku hadalnaa Carabi, Bengali, Urdu, Danish iyo Boolis. Quudinta sabiga taageerada lodka ah ayaa la helayaa (naasnuujin, masaasad, koob).

Wixii macluumaad dheeraad ah, fadlan kala xidhiidh Ewa **07961 232 431** ama Matan **07984 326 606**.

Duug duugniinka ilmaha

BILAASH

Khamiis kasta 1.45 duhurnimo ilaa 3 galabnimo

Maternity Champions waxay bilaabaya duruus cusub, oo bilaasha ah, oo duug duugniinka ilmaha oo la siinayo waalidka iyo caruurta mudo lix todobaad ah ee guur guurta. Wixii balansi ah iyo macluumaadk dheeraad ah, kala xidhiidh Ewa **07961 232 431** ama Maran **07984 326 606**.

Xarunta Clement James ee soo socota

Badqab: Maalinta daryeelka nafta ee dumarka

Khmiis 28 Noofember 10 subaxnimo ilaa 2.30 duhurnimo

Nagu soo biir wixii munaasabado ah ee soo jiidasho leh ee dhamaan dumarka ah si aad u baadho dheefaha daryeelka nafta. Is qurxinta, dabiib madalo ah iyo aqoon iswaydaarsi. Hadyad **BILAASH AH** iyo qado macaan ayaa lasiinayaa dadka ka qayb gala. Jagooyinka banaana ayaa xadidan markaa hore u balanso adiga oo la xidhiidhaya Bobby ama Becky wellbeing@clementjames.org ama la hadal **020 7792 9189**.

Taageerada aqooneed ee dugsiga sare

Taageerada layliiska waxbarshada kadib ee guriga ee ardayda da'da 7-13. Iimeel noogu soo dir youngpeople@clementjames.org



Barnaamijka tusaalaynta jaacamada


Hadii aad ku jirto sanadkii 13 ee waxbarasho oo aad doonayso inaad gasho jaamcada waxaanu kaa caawin karaa Barnaamijka Tusaalaha Wada Shaqaynteenaa oo ka dhacaya IntoUniversity North Kensington. Nagala soo hadal **020 7221 8801**.

Duruuska waxbarashada dadka waawayn

Gal fasalo Ingiriisi/Xisaab/ICT oo bilaabmaya mark kale Janaayo 2020.

Mashruuca beerista?

Ma doonaysaan inaa wax beertaan? Ma jeceshahay banaanka u bixida? Wax fikir ah kama haysataa meesha banaana ee LancWest? Herb Robert, oo degan Lancaster West iyo Beeraleyda Bulshadeeda cusub, ayaa bilaabaysha mashruuc cusub oo wax beeris ah oo ubaxyada, khuraadta bisil iyo cagaaran lagu beerayo iyo wax kale oo badan! Wixii macluumaad dheeraad ah ama ka qayb gelida, kala hadal Herb Robert on **07814 612 876** ama iimeel ugu dir isaga robert.halbert-pereno@rbkc.gov.uk



Macluumaadka ugu danbeeyay ee Bushada Grenfell Walk Mashruuca Farshaxanka

Mashruuca Farshaxanka Grenfell Walk wuu socdaa. Arday ka socota Machadka Kensington Aldridge iyo dad degan Lancaster West ayaa sameeyay farshaxan loogu talo geley wajiga 1 ee mashruuca.

Aasha-Joy John, madaxa farshaxanka KAA ayaa kala shaqeyay GCSR ardayda ah taas oo kamid ah manjahka lagu abuurayo farshaxanka kaas oo qaadan doona meel 100m ah oo diyaar u ah in la geliyo Diseember. Dadka degan Lancaster West ayaa sidoo kale ka qayb geley afar aqoon iswaydaarsi Juulay iyo Sebteember si loo abuuru farshaxan qaybta Lancaster

West kaas oo qaadan doona meel 10m ah.

Mashruuca waxaa iska kaashanaya NHS Grenfell Health & Wellbeing Service iyada oo adeegsanaya muuqaal kombuyuutar (VR) si loo abuuru farshaxan. Tani waxay siin doontaa fursad ardayda inay sameeyaan farshaxan kaas oo loo marayo VR oo waxa uu yeelan doonaa farshaxan iyo farsamo lagaga talo qaadanayo ardayda teknooloojiyada.

Grenfell Walk Community Art Project



Kordhinta midhaha beerta Talbot Grove

Arbaco Kasta 4 galabnimo ilaa 6 galabnimo

Kooxda beerta Talbot Grove waxay kordhinayaan midhaha xagaaga iyo dayrta. Waxay wakhti gelinayaan beerta oo waxay siinayaan dadka deegaanka oo da' kasta ah fursad ay kula shaqaynayaan, oo waxay sidoo kale dhiiri geliyaan caruurta inay cunaan khudaar bisil iyo khudaar cagaaran oo badan. Ciida waa lagu shubay xagaaga 2018. Kooxdu waxay u furan tahay dhamaan dadka deegaanka ee guryaha oo dhan.



WADA SHAQAYNTA CUSUB EE BULSHADA

Tababarayaasha bulshada ayaa shaqada bilaabaya




Sadexdan toborayaal waxay bilaabayaana shaqada LWNT ee kooxda dayactirka. Dhamaan sadexduba guryaha ayay degan yihiin. Waxay ka barbar shaqeeyaan shaqaalaha qasabada iyo laydhka guryaha u shaqeeyaa kuwaas oo ka caawiya xirfadaha. Dhamaan sadexduba waxaa la siiyaa Mushaharka Ku Noolaanshaha London.

Shaqaalaysiintu waxay muujinaysaa dadaalka aanu ugu jirno taageerada dhaqaale waqooyiga Kensington iyada oo laga caawinayo dadka deegaanka inay helaan tobobar iyo shaqo. Waxaanu leenahay Koox Hormarka Bulshada ah oo

noo shaqaysa oo si dhawna ila shaqaysada dadka degan Lancaster West Estate si dakhliga dadkad eegaanka kor loogu qaado £1million. Ilaa iminka waxaanu kaadhay £450,000, waxaana ay korodhay £230,000 ilaa xagaagii.

BARTILMAAMEEDKA KOOXDA HORMARKA BULSHADA 2019-20



Talooyin dhaqaale oo bilaasha ah oo dadka deegaanka ah

Waxaanu shaqaalaysiinay Saraakiil Dakhli iyo Wada Jirka Dhaqaalaaha oo ka caawiya dadka deegaanka maaliyadooda. Ola waxa uu u shaqayn doonaa Qaybta 7, Qodka Hoose Isniin ilaa Jimce. Waxaanu sidoo kale samaynaa qaybo kirada ah oo Qaybta 1, Qolka Hoose Talaato kasta.

Wixii macluumaadka ah fadlan nagala soo xidhiidh **0800 389 2005** ama iimeelka ola.ayoola@rbkc.gov.uk

Fursado shaqo

Fadlan nagaasoo hadal **0800 389 2005** ama lancasterwestoffice@rbkc.gov.uk si aad u heshi macluumaadka ugu danbeeyay ee fursadaha shaqo iyo carwooyinka shaqada.

Kulanka kowaad ee Shirka Bulshada Grenfell

Wax ka badan 40 qof oo deegaank aah ayaa ka qayb geley kulanka kowaad ee Shirka Guud ee Grenfell oo ka dhacay Dugsiga Hoose ee Avondale Park dhamaadkii Sebteember.

Waxaanu aad ugu mahadnaqaynaa dhamaan dadka ka qayb geley iyo cida aanu wada shaqayno kuwaas oo wakhti siiyay si ay uga qayb galaan Kulanka, kaas oo diirada saaraya caafimaadka iyo badqabka.

Waxa ay kor u qaaday fursada ay dadku kaga hadli karaan mawduucyada u muhiimka ah oo ay kamid tahay la shaqaynta wakiilada Kooxda Gudida Xarumaha Caafimaadka (CCG) ee deegaanka, Central and North West

London NHS Foundation Trust (CNWL), Public Health England iyo hay'ada samo falka sida Together for Grenfell, One You Kensington & Chelsea, Everyone Active, Kids on the Green iyo Latimer Community Art Therapy.

Dadka deegaanka ayaa ka qayb geley wada hadal miiska ah oo mawduucyo kala duwan oo ku saabsan caafimaadka maskaxda, walaacyada neefsiga, daryeelka kowaad, adeegyada GP iyo ciida wadakhda ciida iyo hawada. Wada hadalka waxaa kasoo baxay fikiro iyo jawaabo.

Waxyaabaha ay dadku ka wada hadleen ee ay soo qaadeen waxa ay ahaayeen:

- takoorka la xidhiidha helitaanka adeegyada deegaanka qaar
- baahida loo qabo in la xaqiijiyo taageero caafimaad iyo badqab oo isku heer ah oo dadka dhalinyarta ah ee ka wayn 18 jirka marka ay waxbarashada ka baxaan.
- macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan helitaanka Shaybaadhka Caafimaadka Kor Loo Qaaday
- su'aalaha ku saabsan tijaabinta ciida iyo hawada

Mawduuca, taariikhda iyo goobta Kulanka Xiga ee Bulshada ee Grenfell ayaa markaa la xaqiijin doonaa.

Hadii aad qabto wax su'aal ah, fadlan iimeel u dir NKengagement@rbkc.gov.uk

Sida nooloola soo xidhiidhi karo

Unit 7, Baseline Studios, Whitchurch Road, W11 4AT

Hadii aad doonayso inaad la hadasho, fadlan lasoo hadal **0800 389 2005**

Saacada furan ee Isniintan ilaa Jimcaha, 9 subaxnimo ilaa 5.30 habeenimo ama iimeelka lancasterwestoffice@rbkc.gov.uk

Nagala soco Instagram @lancasterwestneighbourhoodteam

Soo dejiso WeAreW11 app

